

# Da' yarta gudan

Ka hortaga gudniinka dumarka



## Kani waa filim ku saabsan gudniinka haweenka

Filimo badan ayaa laga sameeyay mowduucan, kuwaas oo lagu sameeyay Norway iyo dibadaba. Filimkaan waxa kuwa kale ka duwaya waa in loogu talagalay, Hablaha yar-yar iyo gabdhaha (da'doodu u dhexayso 15-25) oo ka yimid meelo laga isticmaalo gudniinka fircooniga ah; hadana ku nool Norway. Filimkan waxuu mowduuc xasaasi ah uga hadlayaa si jilicsan. Wuxuu ixtiraamayaa kala duwanaanta dhaqanka wadanka ay gabdhaha ka soo jeedaan, laakiin waa mid ka run sheegaya sidii loo ilaalin lahaa qanuunka wadanka ay yimaadeen (gabdhaha). Kani waa filim loogu talagalay, dadyowga ka yimi meelaha gudniinka fircooniga laga isticmaalo. Filimkani wuxuu faah-faahinayaa asalka gudniinka fircooniga si dad aan aqoon hore u lahayn u fahmaan, iyadoo tusaale ahaan la kaashanayo matalaad.

Filimkan waxaa la sameeyay iyada oo niyadda lagu hayo caawinta koox-dhalinyaro ah.

Filimkaan waxaa loo sameeyay si aanan loogu baahan in la fahmo luuqadda Norway, ama qofku horay wax u bartay. Filimka waxaa loo sameeyay codadka Norwijiyaan, Ingiriis, Soomaali iyo Tigrinya.

Filimka waxaa soo saaray RVTs Sor oo ay gacan siisay hay'ada Save the Children Norway.

Filimkaan dhaqaalaha waxaa bixiyay, Hay'adda Norwijiyaanka ee caruurta, dhalinyarada iyo qoyska (Bufdir).

## KOOXDA LOO SAMEEYAY FILIMKAN

Filimka waxaa lala beegsaday laba kooxood oo dadka ka mid ah.

Haweenka da'da yar iyo gabdhaha ee ka soo jeedo meelaha uu saameeyay gudniinka Fircooniga ah. Hablo badan oo waayo aragnimo u leh, gudniinka fircooniga ayaa ka qayb qaatay habaynta filimkan iyo fariinta uu xambaarsanyahay. Inkastoo filimkan loogu talagalay haweenka da'da yar, hadana dumarka iyo raggaba waa ka faa'iidayaan. Waxaa si gaar ah loo adkaynayaa in wada hadalka iyo sheekadu ay u furuntahay kooxyaha jinsiyad gaarka.

Kuwa dhalinta caawintooda fududeeya, iyo

aqoonyahanada haweenka da'da yar-yar kula kulma meelaha caafimaadka, dugsiyada dhexe, ama kuwa hoose, xarumaha magangalyo-doonka, waxbarashada dadka da'da wayn ama kuwa fududeeya ee ka yimi meelaha laga isticmaalo gudniinka fircooniga, ayaa u adeegsan karo filimkaan qaab wacyi galin ama bandhig doodeed laga qayb qaato.

## U JEEDKA FILIMKA

U jeedka filmku waa in la xaqiijyo in aan dhaqanka loo gudbin jilka soo kacayo, sidoo kale filimkan wuxuu muujinayaa in nolol wanaagsan lagu noolaan karo, galmo caafimaad lehna la sameen karo, xitaa hadii qofku gudanyahay.

## QAABABKA LOO ADEEGSAN KARO FILIMKAN

Filimkan waxaa loo adeegsan karaa isku imaadyada caawinta dhalinta, marka hore inta loo shido filimka koox, kadibna loo yeero kuwa ka qayb qaatay si ay uga dhiibtaan fikirkooda, ayada oo qof wayn uu korjooge u yahay kaas/taas oo ah qof takhasus u leh caafimaadka ama ka mid ah kuwa adeega caawinta dhalinta fududeeyo. Waxaa kaloo loo adeegsan karaa filimka si uu warbixin u siiyo, hordhacyada barnaamijyada, xarumaha magangalyo- doonka, dugsiyada/iskuulada, ama meelaha daryeelka caafimaad ee waaweyn.

## DHISMAHA/QAABKA FILIMKA

*Filimku wuxuu u qaybsamaa laba qaybood oo waaweyn.*

1. Warbixin xaqiiqo ah oo ku saabsan gudniinka fircooniga iyo dhibaatooyinka caafimaad. Warbixintan oo kale waa muhiim, waayo aqoontu waxay saameysaa hab-dhaqanka. In laga hortago gudniinka fircooniga waxay u baahantahay, in la badalo fikiradahaas, iyo in xaqiiqdu ay badasho kutiri-kuteenta. Waxaana rajaynayanaa in haweenka da'da yar iyo gabdhaha uu cilmigaan anfacu, una noqdo mid ku abuura kalsooni ayna uga hortagaan dhibaatooyinka uga imanaya bulshada.

# Da' yarta gudan

Ka hortaga gudniinka dumarka



## *Kani waa filim ku saabsan gudniinka haweenka*

2) Qofka sida uu isu arko, sida uu qofku galmadiisa u arko, rajoda iyo fursadaha u furun qofka la guday. Haweenka uu gudniinku saameeyay, ee ku nool Norway waxay iska dhaadhiceyeen in jirkoodu dhaawancanyahay, tani waxay keeni kartaa dareen ceeb taas oo la xidhiidha sida ay isu arkaan iyo galmaba. Filimka wuxuu xoogga saarayaa mowduucan si looga hortago dareenka adag oo ay haweenka/gabdhaha dareemayaan, oo ah ceeb iyo rajo xumo. Waa arinta loo doortay filimka dhexdiisa erayada ah, 'gudniinka haweenka' halkii la dooran lahaa "waxyeelada xubinka taranka".

Filimka wuxuu u qaybsanyahay cutubyada soo socdo.

1. Hordhac – sheekadayda
2. Sidee u egyahiin xubinka taranka ee gabdhaha
3. Waa maxay gudniinka haweenka?
4. Xagee laga isticmaalaa?
5. Gudniinka haweenka sharciga ma ogolyahay?
6. Sidee ayuu gudniinka haweenku caafimaadka wax u yeelaa?
7. Kutiri kuteen ku saabsan gudniinka.
8. Sidee isu tag wanaagsan ninkaaga ula yeelan kartaa hadii aad gudan tahay?

Waxaad dooran kartaa cutubyada aad doonaysid inaad tusto, ama waxa aad jeceshahay in aad ku soo celiso, adiga oo dhaqaajinayo calaamadeeyaha saaran wakhiyada filimka.